



Habsocodka Waqtiga Jadwalka Wada-Hadalada: Miyey PPS Shardi ugu Dhigtaa inay Dhammaan Ardayda Da'doodu tahay 12 Sanno iyo Ka Weyn Weydiiso Inay Ka Tallaalan Yihii COVID-19?

Qoysaska Qaaliga ah PPS,

Iyada oo Golaha Waxbarashada PPS tixgalin siinayo in shardi looga dhigo ardayda (da'doodu tahay 12 sanno iyo ka weyn) in la weydiyo inay qaateen tallaalka COVID-19, waxaan idin siineynaa warbixin kooban waqtiga ay suurtagal tahay go'aankaasi:

Sebtembar 28 – Golaha Waxbarashada PPS Wuxuu Ka Dhageystay Khabiirada:

Bishii Sebtembar 28, Goluhu wuxuu ka dhageystay khabiirada caafimaadka dadweynaha iyo takhaatiirka caruurta waxyaabaha iman kara iyo cawaqaqibka ay keeni karta inay shardi looga dhigo in la qaato tallaalka COVID-19 marka dugsiga la dhiganayo, [warbixinta kooban ee shaqaalaha](#). Kulan oo oo la duubay waxaa laga helayaa [halkan](#).

Todobaadkii Oktoobar 18 – Goluhu wuxuu dhageystay bulshada:

Todobaadkani waxaa la qabtay [kulano dhageysi](#) oo taxane ahaa iyada oo loo qabtay qoysaska iyo ardayda. Waxaad ka arki kartaa kulanada bulshada ee Janalkayaga ([YouTube channel](#)).

Oktoobar 26 – Doodii golaha:

Goluhu sidiisii caadiga ahayd waxay kulmeen Oktoobar 25 saacadu markay ahayd 6:00 fiidkii., Goluhu wuxuu qaban doonaa dood dadweyne oo ku saabsan waxyaabaha ka dhalan kara iyo saameynta shuruuda tallaalka.

Noofembar 2 – Waxaa Suurtagal ah in Goluhu u Codeeyo

Haddii Goluhu go'aansado in hore loogu socdo shuruuda, waxaa tixgalin laga fiirsanayo la siin doonaa iyadoo loo codeynayo shuruuda tallaalka ardayda marka uu goluhu yeelanayo kulankiisa bisha Noofembar 2deeda.

WAA MAXAY WAXA UU GOLUHU TIXGAINTA SIINAYO?

Iyada oo xubnaha goluhu ay misaamayaan saameynta shuruuda tallaalka, waxay sidoo kale tixgalinayaan dhowr ikhtiyaari oo ay ka mid yihiin:

- In shuruud looga dhigo dhammaan ardayda ka qeybqaadanaya hawlaho manhajka dheeraadka ah sida (tusaale, ciyaaraha, kooxda muusikada, bandhiga riwaayada kuwaasi u muuqda inay khatar weyn leeyihiin inay gudbiyaan xanuunka COVID-19, kaliya);

- In shuruud loo dhigo tallaalka dhammaan ardayda PPS ee da'doodu tahay 12 sanno iyo ka weyn;
- In shuruud looga dhigo tallaalka dhammaan ardayda PPS ee da'doodu tahay 16 sanno iyo ka weyn; iyo
- In aan la weydiin shuruudaha tallaal dheeraad ah ardayda waqtigani.

Intaas waxaa dheer, marka la eego xeerka Oregon, waxaa suurtagal ah in golaha waxbarashadu inay si dheeraad ah u macneyn karaan dadka laga dhaafi karo shuruuda tallaalka arrimo caafimaad awgeed. Golaha Waxbarashada PPS waxay sidoo kale miisaamaya iyaga oo tixgalin siinayaan cawaaqibka ka dhalan karan ikhtiyaariga dadka caafimaad ahaan looga dhaafayo tallaalka. Wuxaan aaminsanahay in PPS leedahay awooda ay ku qabatimi karto shuruudo fara badan oo ku aadan tallaalka, kuwaasi oo ay ka mid yihiin in la xaddido dadka caafimaad ahaan looga dhaafayo tallaalka, laakiin tani lama tijaabin fasiridaa sharci ahaan ee waqtigan aan ku jira xanuunka faafaya ee COVID-19.

Waxaan idinku martiqaadeynaa inaad la socotaan kulanka Golaha Waxbarashada PPS, ee maalinta Tallaadad, Oktoobar 26, idinka oo nagala socon kara [PPS YouTube channel](#).